Warbixinta Arrimaha Bani'aadamnimada
SOOMAALIYA

4 Oktoobar-5 Nofeembar 2018

OCHA

QODOBBADA

- Hay'adahu waxay sare u qaadayaan hab nololeedka iyo u adkeysiga aafooyinka
- Colaadda Shabeellaha hoose waxay barakicisay dad badan
- Barakicin khasab ah oo Muqdisho ka socota
- Cudur weyn oo la xakameeyay
- Talaalka dabaysha oo weli socda
- Caafimaadka maskaxda wuxuu u baahanyahay hortebin
- Dhaqaale dheeraad ah ayaa loo baahanyahay si gargaarku u socdo

TIRADA

# Dadka tabaaleysan	4.6m
# Dadka ku jira xaaladaha degdegga ah ee bini'aadamnimo heerka 3aad iyo 4aad (IPC Phases 3 &4)	2.m
# Dadka ku jira xaaladaha degdegga ah heerka 4aad (IPC Phase 4)	0.2m
# caruurta la qiyaasayo iney nafaqo darro heyso	1.2m
# Dadka gudaha ku barakacay ilaa Nofeembar 2016 abaarta awgeed	1.6m
# Dadka ku nool xaalad barakac dabadheeraatay	1.1m

DEEQAHA

$1.5 BILYAN
Dalabka qorshaha ka falcelinta baahiyaha bini'aadamnimada (HRP)

$857 MILYAN
Wadarta dhaqaalaha loo helay mashruuca HRP)

(Source : http://fts.unocha.org, 30, Oktoobar 2018)

Malaayiin caruur ah ayaa laga tallaalay cudurka dabaysha guud ahaan wadanka (PHOTO/UNICEF - Somalia)

Nuqulkan waxaa ku jira

Warbixinta jawaabaha la bixiyay P.1
Warbixinta barakaca P.2
Warbixinta caafimaadka P.3
Warbixinta deeqaha P.5

Hay'adaha gargaarka oo sare u qaadaya kaalmooyinka la xiriira hab-nololeedka iyo u adkeysiga aafooyinka

Xilli roobaadka Gu-ga ee 2018 oo wanaagsanaa iyo gargaar bani'aadamnimo oo la joogteeyay awgood waxaa la helay dalaggii ugu wanaagsanaa 10kii sano ee lasoo dhaafay. Dadka tabaaleysan waxay hoos ugu dhaceen 4.6 milyan halkii ay awal ka ahaayeen 6.7 milyan. Sida ay sheegtay hay'adda cuntada iyo beeraha qaybteeda qaabilsan warbixinnada la xiriira biyaha, roobkii da'ay bisha Oktoobar wuxuu ka hooseeyay intii la filaayay qaybo badan oo Soomaaliya ka tirsan. Sida uu noqdo roobku bilahan Nofeembar iyo Diseembar waxay saameyn ku yeelan doontaa wax soo saarka beeraha. Inkastoo sara ukac wax ku ool ah uu jiro oo dhanka sugnaanta cuntada ah, laakiin dadka abaarihii 2017 ku dhaceen waxay u baahanyihiin xilli roobaadyo is xigxiga oo wanaagsanaada si ay usoo kabtaan.

Hay'adaha gargaarku waxay qiyaasayaan in ilaa 6.4 milyan oo xoolo ah ay u dhinteen baad/biyo la'aan iyo cudurro intii u dhaxeysay 2016-2017 abaarihii jiray. Qiima ahaan waxay u dhigmaan 1.3 bilyan oo doolar.

Haddaba si looga taxaddaro kaabayaasha nolosha, Hay'adda Cuntada iyo beeraha ee FAO waxay tallaashay 14 milyan oo xoolo ah sannadkan. Waxaa hadda socda olole kale oo lugu tallaalayo ilaa 14.5 milyan oo xoolo ah. Tallaalku waxa kale oo uu fududeynayaa in xoolaha Soomaaliya loo suuq geyn karo adduunka ayagoo caafimaad qaba.
Si sara loogu qaado caafimaadka xoolaha, xoolaleydu iyo xoola dhaqata-beeraleydu waxay hadda garwaaqsadeen baahida loo qabo in lasoo saaro calaf si aan loogu tiirsanaan daaqa oo kaliya.

Horumarka laga sameeyay dhanka sugnaanta cuntadu waxay furtay fursadda ah in la maalgeliyo dhanka mashaariicda soo kabashada iyo u adkeysiga aafooyinka. Hay'adaha ka shaqeeya gargaarka bani'aadamnimada iyo soo kabashada sida FAO waxay si xooggan uga shaqaynayaan iney dib u soo celiyaan hab-dhiskii waraabka beeraha si looga hortago abaaro iney ka dhacaan dhulka ay webiyadu maraan. Dhulkan waxaa ku nool bulsho beeraleey ah oo aad u nugul. Macluushii 2011 dayax gacmeedyadu waxay tuseen in wax soo saarka beeruhu uu wanaagsanaa meelaha hab-dhiskooda waraabka beeruhu uusan burburin ayadoo weliba ay abaartu jirtay. Inkastoo xilli roobaadkii Gu-ga ee 2018 uu kor u qaaday wax soo saarkii beeraha, hadana fatahaado dhacay ayaa burburiyay qaar kamid ah dalagga iyo qalabkii beeraha. Dadka ku nool jiinka webiyada qaarkood waxay weli ku jiraan xaalad cunta yari heerka 3aad (IPC3) halka dadka ku nool meelaha ka fog webiyada aysan gaarin fatahaaduhu ayna ka faa'iideysteen roobabkii taas oo keentay in heerka sugnaanta cuntadooda uu sara u kaco.

Qiimaha xoolaha ku baaba'ay abaaraha waxaa lugu qiyaasay $1.3 bilyan

Dayactir ayaa lala gaaray 17 goobood oo ay maraan webiyada Juba iyo Shabelle, gaar ahaan meelaha qarka webiga uu jilciyay roobkii Gu-ga ee 2018 iyo kuwa la qiyaasayay inuu saameeyn ku yeelan karo roobka Deyrta. Tani waxay dheeraad ka tahay 45 goobood oo la dayactiray horraantii sannadkan. Dayactirkan waxaa barbar socday dib-u-dhis lugu sameynaayay hab-dhiska waraabka beeraha si loo yareeyo saameynta fatahaaduhu ku yeelan karaan dalagga iyo si loo hubiyo in beeraleydu aysan dhib u geysan karkaarka webiga ayagoo ku dadaalaya iney weibga usoo leexsadaan beerahooda marka ay biyo-yari jirto. Si kastaba ha ahaatee, waxaa loo baahanyahay in wax laga qabto carrada buuxisay webiga oo yareysay xajimigii webiga sidoo kalana kordhisay fatahaadaha.

FAO iyo WFP waxay ka wada shaqeynayaan iney dhisaan goobo biyaha lagu celiyo ayadoo la isticmaalayo barnaamjiyada shaqo lacag ku bedelashada; si biyaha loogu keydiyo isticmaalka dadka iyo xoolaha.

Warbixinta Barakaca

34,000 oo qof ayaa ka barakacay Shabeellaha Hoose illaa bilowgii Agoosto ee sannadkan

Barkac ay colaado keeneen ayaa ka jira Shabeellaha Hoose

Qalqal dhanka amniga ah iyo colaado jira ayaa waxay sababeen hirar cusub oo barakac ah gobolka shabeellaha hoose ee Dowlad Goboleedka Koofur Galbeed Soomaaliya bilihii lasoo dhaafay. Sida ay qabto UNHCR qaybteeda PRMN, in ka badan 34,000 oo qof ayaa ka barakacay gobolka shabeellaa hoose laga soo bilaabo horraantii Agoosto, kuwaas oo ku soo biiray kumanaan horay gobolka uga soo barakacay sababo la xiriira colaado, abaaro iyo daadad. Dadkan soo barakacay waxay u badanyihiin dumar iyo caruur.

Dadaallada dib-u-heshiisiinta ee ay hormuudka ka tahay Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ee ku aaddan in la joojiyo colaadaha u dhexeeya qabiillada gobolka wada dega waxay hoos u dhigeen xiisaddii ka jirtay dhulka qaarkii. Haddaba, waxaa cabsi laga qabaa barakac hor leh oo ay sababi karto gulufka milateri ee gobolka ka socda.



Inkastoo wax xoogaa guul ah laga gaaray in xaaladda la dejiyo, barakacan soo kordhay wuxuu sababay sara ukac ku yimid baahiyaha bini'aadamnimada ee meelo ka mid ah gobolka, meelahaas oo ay adagtahay in la gaaro, Waxaa yar warbixinta arrintan la xiriirta ee la heli karo sababo ay ugu weyntahay amni darro deegaanka ka jirta iyo hay'adaha gargaarka ee ka howlgala gobolkan oo aad u xaddidan. Hay'adaha gargaarku waxay walaac ka muujinayaan xadudubyo laga soo sheegayo deegaankan gaar ahaan isu socodka dadka oo xanniban, xarig aan loo meel deyin oo lugula kacay dad rayid ah iyo burbur hantiyeed oo la geystay.

Guud ahaan 2.6 milyan oo qof ayaa gudaha Soomaaliya ku barakacsan

Hay'adaha gargaarku waxay sara u qaadeen kaalmada iyo adeeg iney u fidiyaan inta Muqdisho usoo barakacday. Qaar kamid ah qoysaska Xamar usoo barakacay waxay muujiyeen iney daneynayaan in ay guryahoodii ku laabtaan hadii xaalada amni ay hagaagto. Kadib markuu booqday kaam barakac 3 Nofeembar, Justin Brady, madaxa OCHA ee Soomaaliya wuxuu ka dhawaajiyay baahi hoy la'aan oo jirtay. Hay'adaha gargaarku si degdeg ah ayay uga jawaabeen ayagoo isla markiiba geeyay qalab roobka iyo cadceeddaba laga geli karo.

Guud ahaan, 2.6 milyan oo qof ayaa gudaha dalka ku barakacsan. Qaarkood dhowr jeer ayaa la barakiciyay kadib markii dhulkii ay degganaayeen dadkii lahaa ay go'aansadeen inay isitcmaalaan. Dadkan gudaha ku barakacay waxay degeen magaalooyinka, gaar ahaan Muqdisho, Baydhabo, Gaalkacyo iyo Kismaayo.

Barakicin cusub oo Muqdisho ka jirta
Kumanaan qoys oo ku noolaa xerada Al-fatow ee KM13 ayaa laga barakiciyay 7 Oktoobar. Inta badan dadkani waxay kasoo barakaceen colaado iyo abaaro horay ugu qabsaday gobolka shabeellaha hoose. Tiro badan oo dadkan ka mid ah dhowr jeer oo hore ayaa la barabixiyay.

Muqdisho oo ah meesha dadka intiisa badan yimaaddeen, hay'aduhu waxay ka wadaan gurmad baaxad leh

Kadib markii loo sheegay inay sadex beri ku baneeyaan meesha, barkacayaashu waxay door bideen inay isaga cararaan guryahii cooshadaha ka sameysnaa ayagoo ka cabsanaya in awood loo isticmaalo. Hanti iyo kaabayaal dadweynuhu lahaayeen, oo ay ku jiraan laba iskuul iyo goobo caruurtu ku cayaaraan oo ay ka faa'iideysan jireen 450 arday, afar fasal, 27 musqulood iyo laba xarumood oo buldhada deegaanku ku kulmi jirtay ayaa la doonayaa in la baabi'iyo. Waxa kale oo loo cabsanayaa laba dugsi qur'aan, 20 dukaano yaryar oo dumar ku shaqeysan jireen iyo laba laambadood oo ah kuwa cadceedda ku shaqeeya.

Baahiyaha degdegga waxaa ka mid ah hooy, cunto, biyo, adeegyada fayadhowrka iyo gargaarka cuntada kasoo hara. Hay'adaha gargaarku waxay raadinayaan hab kasta oo lagu caawin karo dadkan ay saameeysay barakicintan cusub. Sidoo kale waxay dowladda kala shaqeynayaan sidii loo sharciyeyn lahaa heshiis kiro shan sano ah oo dad barkacayaal ah ay ku degganyihiin dhul gaar loo leeyahay oo ku yaalla Baar Xaraf, halkaas oo dadkii lasoo barabixiyay ay hadda soo degeen.

Barakicinta khasabka ah cirka ayay isku sii shareertay sannadkan 2018 gudahiisa. Intii u dhexeysay Jannaayo iyo Oktoobar, ku dhowaad 235,000 oo barkacayaal ah ayaa goobihii ay degganaayeen laga saaray guud ahaan Soomaaliya. Tiradani waxay ka badantahay cadadk barakacayaasha ah ee la barabixiyay sannadkii 2017 oo dhan. Celcelis ahaan, 11,000 oo barakacayaal ah ayaa laga saaraa meelaha ay deganyihiin bil walba, in badan oo dadkan ka mid ah waxay soo mareen barakicinno dhowr ah.

Hanti iyo kaabayaal ayaa qatar ugu jira in la burburiyo barakicinta awgeed

Barakicintu waa welwel soo noqnoqda, barakacayaashana wuxuu baylah uga dhigaa hoy la'aan, nolol la'aan iyo rabshado. Barakacayaal badan ayaa deggan dhul gaar loo leeyahay ayagoo aan heysanin heshiis kiro oo la ogyahay, arrintani waxaay ka dhigtaa kuwa mar walba qatar ugu jira in la barabixiyo. Dumarka iyo caruurtu waa kuwa mar walba ugu nugul qataraha ka yimaada barakicinta sababtoo ah hooy la'aanta ayaa baylah uga dhigto xadgudubyada.

Deeq iyo dadaal degdeg ah ayaa loo baahanyahay si kor loogu qaado dadaallada lugu korjoogteynayo iyo kuwa lugula tacaalayo saameynta ay keeni karaan barabixinta aan sharciga waafaqsaneyn, oo ay ku jirto in dhanka sharciga laga kaalmeeyo dadka uu saameeyo barakicinta iyo in maamulka laga taageero sidii awooddooda maamul kor loogu qaadi lahaa. Hay'aduhu waxay kala shaqeynayaan dowladda in xal loo helo barabixinta, tallaabooyinka xalka noqon kara waxaa ka mid ah in barakacayaasha loo helo dhul ay si rasmi ah u degaan ama kiro sharci ah lagu dejiyo.

Warbixinta caafimaadka

Cudur weyn ayaa la xakameeyay
Hoos u dhac weyn oo la xiriira cudurrada faafa (shuban-biyoodka, jadeecada iyo malaariyada) ayaa la diiwaan geliyay sannadkan guud ahaan wadanka. Kooxaha dabagalka iyo la socodka waxay kormeeri doonaan suurtagalnimada cudurro dillaaci kara. Sannadkan 2018 gudahiisa waxaa la diiwaan geliyey 6,520 kiis oo shuban-biyood/ daacuun ah, oo ay ku jirto 42 dhimasho ah (0.7 boqolkiiba); oo inta badan laga diiwaan geliyay dhulka ay maraan webiyada Juba iyo Shabelle. Waqtigan oo kale sannadki 2017, 78,000 oo kiis ayaa la diiwaan geliyay oo 1,159 kiis ay dhimasho tahay. Kiisaska looga shakisanyahay iney jadeecada yihiin hoos ayay u dhaceen, ilaa hadda waxaa la diiwaan geliyay 7,034 kiis inta ka tagtay sannadkan 2018; tani waxay u dhigantaa hoos u dhac sadex meelood oo laba ah markii loo eego sannadkii 2017.

Hoos u dhacan waxaa qayb ka qaatay xaaladihii abaarta oo dhamaaday iyo tallaabooyin ka hortag ah oo la qaaday bilihii ugu danbeeyay sannadka 2017 iyo horraantii 2018, sida

olole talaalka daacuunka ee afka laga qaato iyo fayadhowrka oo wacyi gelin laga sameeyay.



Iyadoo ay jirto dhaqaale yari, ayay hay'adaha caafimaadku guulahan gaareen. Mashaariicda caafimaadka ee Soomaaliya waxay wajahayaan dhaqaale xumo aad u daran. Hadda oo la joogo Oktoobar 2018, qeybta caafimaadka ee ka midka ah qorshaha ka falcelinta baahiyaha bani'aadamnimada wuxuu helay 18.5% ($23 milyan oo kamid ah $124M ee horay loo codsaday). Caqabadahan la xiriira in la heli waayay deeq howlaha caafimaad lugu socodsiiyo awgeed, hay'adaha qaarkood waxay hoos u dhigeen amaba wada joojiyeen mashaariicdii caafimaadka ee ay wadeen. Arrintan waxay keeni kartaa in gunno loo waayo shaqaalaha caafimaadka, hoos u dhac ku yimaada daawooyinka iyo weliba iney xirmaan goobo caafimaad oo hadda bukaan badan loogu adeego. Awoodda dowladda ay kusii wedi karto adeegyada caafimaad aad ayay u yartahay. Lacag degdeg ah ayaa loo baahanyahay si caafimaadku u shaqeeyo hay'aduhuna u awoodaan iney ka jawaabaan baahiyaha jira.

Talaalka dabaysha oo socda

Hadda oo la joogo Oktoobar, waxaaa la xaqiijiyay 12 kiis oo ah (cVDPV) Soomaaliya sannadkan, inta badan kiisaskan waxaa laga dhex helay bulshada reer guuraaga ah iyo qoysas barkaacayaal ah.

Kooxaha talaalka dabaysha waxay qabteen laba wareeg oo olole tallaal ah guud ahaan dalka

Nooca dabaysha ee la yiraahdo cVDPV waa fayras mar mar dhif ah ku dhaca dad horay u qaatay dhibcaha talaalka dabaysha. Dadaallada la socodka astaamaha cudurka dabaysha ayaa wuxuu ka socdaa 933 xarumo caafimaad guud ahaan dalka. Marka ugu horreysa ee kiis la xaqiijiyo, baaritaanno waafi ah ayaa la sameeyaa olole talaalna waa la abaabulaa si looga hortago in cudurku sii fido.

Si hadaba loo joojiyo faafidda faayraska dayabsha, Wasaaradda Caafimaadka oo gacan ka heleysa hay'adda Caafimaadka Adduunka ee WHO iyo UNICEF waxay talaalayeen caruurta shanta sano ka yar wadanka oo idil gaar ahaan maalmaha loo asteeyay talaalka waxaana la qorsheeyay in la talaalo 2.5 milyan oo caruur ah. Ololihii ugu danbeeyay ee tallaal oona ahaa kii sideedaad ee sannadkan wuxuu socday 29 Oktoobar ilaa 1 Nofeembar.

Hay'adaha caafimaadka waxay mar walba taageeraan ololaha talaalka si loo hakiyo faafitaanka fayraska taas oo looga gol-leeyahay in ilma walba uu helo talaalka dabaysha ee loogu talo galay si kor loogu qaado iska difaaca cudurrada ee guud ahaan bulashada. Tani waa sida kaliya ee lugu jooji karo faafidda fayraska dabaysha.

Ku xeel-dheere cudurrada dhimirka ayaa ugu baaqay dowladda iney ahmiyad siiso xanuunka dhimirka

Daryeelka cudurrada dhimirka waxay u baahanyihiin hortebin.
10ka bisha Oktoobar, Soomaaliya waxay qayb ka ahayd munaasabadda lagu xasuusanaayay maalinta loo asteeyay caafimaadka dhimirka. Dr. C/raxmaan Cali Cawaale (Xabeeb) oo ah dhaqtar caafimaad oo ku takhasusay cudurrada dhimirka wuxuu ugu baaqayaa dowladda iyo hay'adaha caafimaadka in ahmiyad weyn la siiyo la tacaalidda cudurrada dhimirka maadaama ay ka mid yihiin mashaakilka caafimaad ee waaweyn ee dalka ka jira. Wareysi aan ka qaadnay, Dr. Xabeeb wuxuu sheegay in cudurrada dhimirka aan la siinin mudnaantii ay u baahanaayeen.

"Dhibka ugu weyn ee jira waxaa weeye waxa aan jirin go'aan iyo ku talagal siyaasadeed oo heer qaran ah, dowladdu ahmiyad weyn ma siiso cudurrada dhimirka. Dowlad Goboleedyadana iskaba daa," ayuu yiri asagoo ku nuuxnuuxsaday in loo baahanyahay in shaqa dheeraad ah laga qabto caafimaadka maskaxda.

Daraasaddii ugu danbeysay ee laga sameeyay heerka caafimaadka dhimirka ee Soomaaliya waxay hay'adaha caafimaadku sameeyeen 2011. Waddanka waxaa ka jira afar cusbitaal oo bixiya adeegyada caafimaadka dhimirka. Hay'adda caafimaadka ee WHO waxay qabtaa in xaaladda caafimaadka dhimirka ee Soomaaliya uu ka hooseeyo dhammaan wadamada soo koraya iyo kuwa uu aafeeyay dagaalka sokeeye. Sadex qof oo kasta mid ayuu hayaa ama soo maray xanuun maskaxeed. Inuu heerkan gaaro xaaladda caafimaadka dhimirka waxaa qayb ka ah sannado badan oo colaado ah, faqriga, shaqo la'aanta iyo isticmaalka maan-dooriyaha.

WHO waxay qabtaa in cudurrada maskaxdu ay Soomaaliya ku badanyihiin marka loo eego wadamada colaaduhu ka jiraan ee kale

Inuu aad u baahay cudurkan ka sokoow, ku xeel-dheerayaasha caafimaadku waxay aaminsanyihiin in arrinta la xiriirta caafimaadka dhimirka uu saameyn weyn ku leeyahay duruufaha dhaqan dhaqaale. Ku xadgudubka dadka qaba xanuunka dhimirka waa dhaqan ku dhex baahay dadka. Tani waxay keentay in bukaanno badan oo la ildaran cudurkan lugu xiro cisbaatallada ama xaafadaha oo weliba la takooro. Inuusan jirin xeer dadkaas lugu ilaaliyo wuxuu ka qayb qaataa in dadkaasu dhibka ku sii jiraan oo aaney helin kaalmada ay astaahilaan ama xaqa u leeyihiin

Ururka Caafimaadka Adduunka wuxuu ku qeexayaa xanuunada maskaxda siyabo balaaran oo ah dhibaatooyin leh calaamado kala duwan, si kastaba ha ahaatee, guud ahaan waxa lagu gartaa isku darka fikrado, caadifado, dabeecad iyo xidhiidhyo lala yeesho dadka kale oo aan caadi ahayn. Tusaalooyin waxa ka mid aha schizophrenia, niyadjab, naafonimo maskaxeed iyo xanuunada uu keeno isticmaalka daroogada. Cuduradaas badankood waa la daaweyn karaa.

Dhaqaala yari iyo xirfadlayaasha xanuunka dhimirka oo yar waxay saameyn ku yeelanayaan in dadku helaan adeegyada cudurkan la xiriira. Xeer ama sharci arrintan ku saabsan inuusan jirin waxay qayb ka tahay in tacaddiga ka dhanka ah bukaannada qaba xanuunka dhimirka uu sii socdo. Waxaa muhiimad weyn leh in cudurrada dhimirka lagu dhafo adeegyada caafimaadka ee aas-aasiga ah. In la helo istaraatiijiyad qaran oo lugu wajaho xanuunka dhimirka lana dhiso qaybo ama waaxyo arrintan la tacaala oo hoostaga wasaaradda caafimaadka waxay ka mid tahay tallaabooyinka ugu horreeya ee loo baahanyahay in la qaado si loo hormariyo adeegyada caafimaadka maskaxda ee dalka.

Warbixinta deeqda dhaqaalaha

Deeq laysku halayn karo ayaa loo baahanyahay si loo joogteeyo howlaha gargaarka dabayaaqada 2018 iyo horraanta 2019.
Dhamaadka Oktoobar 2018, Qorshaha ka falcelinta baahiyaha bani'aadmnimada wuxuu helay $671 milyan oo doolar. Hadii lugu daro $186 oo banaanka ka ah sanduuqan, mashaariicda bani'aadamnimada ee Soomaaliya wuxuu helay $857 milyan oo ah qaaraankii deeq bixiyaasha.

Wadarta guud ee dhaqaalaha la helay 2018 waxay lamid tahay deeqdii la helay lixdii bilood ee hore ee 2017dii. Si isdaba joog ah ayay deeq bixiyaashu uga soo jawaabayeen dalabka

hay'adaha maadaama ay jirtay cabsi laga qabay macluul iney dillaacdo, cudurro iyo barakac.



Inkastoo ay jirto horumar laga sameeyay dhanka bani'aadamnimada, taageero dhaqaale oo xooggan oo laga helo deeq bixiyaasha waa lagama maarmaan si loo sii wado kaalmada naf-badbaadiska ah horraanta 2019ka taasoo ay garab socoto sara u qaadidda kaabayaasha nolosha iyo taageeridda mashaariicda u adkeysiga aafooyinka.

Wixii faahfaahin ah, kala xiriir: Tapiwa Gomo, Head of Communication, gomo@un.org, Tel. +252 616 548 007. Antonette Miday, Public Information Officer, miday@un.org, Tel. +254-731 043 156. Mursal Ali Ahmed | Public Information Analyst, mursalali@un.org, Tel: +252619150457/ 252615679998. Ause Abdelhaq | Communication Assistant, ause@un.org, Tel: 254 715743354. OCHA humanitarian bulletins are available at www.unocha.org/somalia | www.unocha.org | www.reliefweb.int